Walmart sam's club Caafimaadka iyo Ogeysiisyada Fayo qabka: Oo ay ku jiraan Ogeysiinta Dhaqamada Asturnaanta, Xuquuqaha Rayidka Bukaanka , Adeegyada Caawinta Luuqada iyo Caawinada Dheeraadka ah, Walaacyada Macmiilka, Heerarka Bixiyaha Medicare, Warbixinta Damaanada Walmart Health

***Ogeysiiska Sharciyada Qarsoodiga:*** **Taariikhda Dhaqan Galka: Maarso 26, 2013 Taariikhda Dib loosaxay: Agoosto 1, 2023**

OGEYSIINKAAN WUXUU SHARAXEYAA SIDA MACLUMAADKA CAAFIMAADKA EE ADIGA KUGU SAABSAN LAGA YAABO IN LOO ISTICMAALO OO LOO SHAACIYO, IYO SIDA AAD U HELI KARTID WARBIXINTAAN. FADLAN U EEG SI TAXADAR AH.

Ogeysiiskaan ee Sharciyada Qarsoodiga wuxuu sharraxayaa sharciyada qarsoodiga ee: Howlgalada Walmart Health & Wellnes, Howlgalada Sam Club Health & Wellness, iyo xarumaha daryeelka caafimaadka gooniga ah iyo bixiyayaasha jaalalka ee Walmart Health. Walmart Health si sharci ahaan ah ayay uga gooniyeysantahay Walmart Inc. oo waxaa ku jiro xarumaha caafimaadka, ilkaha, iyo xarumaha caafimaadka hab dhaqanka. Dhammaan hay'adahaan waxay si wadajir ah u aasaaseen oo ay uga qeybqaateen diyaarinta daryeelka caafimaadka diyaarsan. Ogeysiintaan waxay quseysaa dhammaan xarumaha iyo goobaha adeeg gaarsiinta ee bixiyayaasha daryeelka caafimaad, sida goobaha Walmart iyo Sam Club halkaasoo ay xarumaha Walmart Health iyo bixiyayaasha jaalka ay ka howlgalaan, iyo farmashiiga Walmart ama Sam Club, xarunta aragga, goobaha indhaha. Waxay sidoo kale quseysaa gaarsiinta adeegyadaan ee Daryeelka Fogaanta ee Walmart Health. Waxaan fahamsanahay in macluumaadkaaga caafimaad ay yihiin kuwo shakhsiyeed waxaana naga go'an inaan ilaalino. Sharciga ayaa na faraya inaan ilaalino qarsoodiga macluumaadkaaga caafimaad ee la ilaaliyey ("PHI"), in aan ku siino Ogeysiiskan waajibaadkayaga sharciga ah iyo sharciyada qarsoodiga ee ku saabsan PHI-daada, iyo in aan kugu soo wargalino wixii ku saabsan jebinta ilaalada Macluumaadkaaga Caafimaad. Waa inaan raacnaa xeerarka Ogeysiinta hadeer.

**Isticmaalka iyo Shaacinta PHI ee Aanan U baahneyn Ogolaanshahaaga: 1. Wixii Daaweyn ah.** Waxaan isticmaali karnaa oo shaac ugu qaadi karnaa PHI-ga ujeedooyin daaweyn sida bixinta daawooyinka ama bixinta baaritaanada, ama maareynta iyo xiriirinta daryeelka caafimaadka ee mid ka mid ah ama dhammaan bixiyayaasha daryeelkaaga caafimaadka. Waxaa laga yaabaa inaan PHI-gaaga siino dhaqaatiirta ku daaweynayo, bixiyayaasha, farmashiyada, bixiyeyaasha daaweynta indhaha, iyo bixiyeyaasha kale ee daryeelka caafimaad ee maareeyo iyo xiriiriyo daryeelkaaga caafimaad ama daaweynta. **2. Wixii Lacag bixin ah.** Waxaa laga yaabaa inaan isticmaalno oo aan shaacino Macluumaadkaaga caafimaad si annaga iyo hay'adaha kale ee caymiska ku jira ama bixiyeyaasha daryeelka caafimaad ay biil uga codsadaan ama ay uga qaataan wixii kharashaad ah adiga, shirkaddaada caymiska, ama qolooyinka saddexaad.Tani waxaa ku jiri karto sameynta baaritaanada u qalmida caymiska ee qorshooyinka Caafimaadka gobolka, Medicare, ama qorshooyinka kale ee caafimaadka, ogaanshaha xaalada diiwangelinta, oo siinta maclumaadka hay'adaha ee naga caawiyo gudbinta biilka iyo uruurinta lacagaha aan ku leenahay.**3. Howlagalada Daryeelka Caafimaadka.** Waxaa laga yaabaa inaan macluumaadkaaga caafimaad u isticmaalno oo aan la wadaagno hawlgalladayada daryeelka caafimaad iyo Hawlgallada daryeelka caafimaad ee hay'adaha kale ee caymiska ku jira oo aad xiriir la leedahay ama aad xiriir la lahaan jirtay.Hawlgallada daryeelka caafimaad waxaa ka mid noqon kara waxqabadyada lagama maarmaanka u ah bixinta adeegyada daryeelka caafimaadka iyo in la xaqiijiyo in aad hesho adeeg ga macaamiil oo tayo leh.**4. Howlahayaga Daryeelka Caafimaad ee Wadajirka ah .**Mid kasta oo ka mid ah bixiyeyaasha adeegga daryeelka caafimaad ee caymis ku jira oo kaqeyb galaya qorshaha daryeelka caafimaadkeena (kor lagu sharaxay) ayaa midba midka kale la wadaagi kar macluumaadkaaga caafimaad si ay u fuliyaan howlaha daryeelka caafimaadka ee la xiriira qorshaha daryeelka caafimaadka.Gaar ahaan, xarumaha Walmart Health iyo bixiyayaasha jaalka ayaa laga yaabaa inay isla wadaagaan PHI-gaaga, iyo ula wadaagaan Walmart Health & Wellness ama Sam Club Health & Wellness, ujeedadaan.**5. Si Aan Kuugula Soo Xiriirno Waxyaabaha Ku Saabsan Alaabaha iyo Adeegyada Caafimaadka.** Waxaa laga yaabaa inaan u isticmaalno ama aan u fasaxno PHI-gaaga inaan kugula xiriirno eek u saabsan daryeelkaaga ama arimaha la xiriiro.Tusaale ahaan, waxaa laga yaabaa inaan u isticmaalno ama aan u fasaxno PHI-gaaga si aan u bixino xasuusiyayaasha balanta, kaala talino daryeelka ka hortaga la heli karo, aan ku siino adeegyada maareynta daaweynta daawooyinka, ama ku soo ogeysiino wax ku saabsan daaweynada kale, ama ku soo ogeysiino wax ku saabsan daaweynada kale oo ay ku jiraan kuwa laga heli karo fursadaha cilmi baarista.**6. [Ku socoto Shaqsiyaadka ku Lugleh Daryeelkaaga ama Lacag bixinta Daryeelkaaga.** Waxaa laga yaabaa inaan macluumaadkaaga caafimaad siino xubin reerkaaga ka mid ah, ehel kale, saaxiib, ama shaqsi kale oo aad adigu dooratay, kaasoo ku lug leh daryeelkaaga caafimaad ama bixinta kharashaadka daryeelkaaga, haddii aad oggolaato shaacintaan, haddii aad fursad u haysatay inaad diiddo oo lakin aadan samaynin, ama aan anugaba u aragno marka loo eego duruufaha jira awgeed in shaacinta noocaan ay tahay mid haboon.**7. Sida Sharciga u Baahanyahay.** Waxaan fasaxeynaa PHI-gaaga markii aan aamino in nalooga baahanyahay inaan sidaas ku sameyno sharciga faderaalka, gobolka, ama deegaanka, amar maxkamadeed ama dalab la mid ah.**8. Ka hortaga Halis Dhab ah ama Badbaadada.**Waxaa laga yaabaa inaan isticmaalno ama aan fasaxno PGI-gaaga markii loo baahdo si looga hortago ama loo yareeyo halista dhabta ah ee ku wajahan caafimaadka ama badqabka qof walba ama dadweynaha. **9. Wixii Howlaha Kormeerida Caafimaadka.** Waxaa laga yaabaa inaan u fasaxno PHI-gaaga hay'ada kormeerka caafimaadka oo sameeya howlaha loo ansixiyay ama sharci ahaan looga baahanyahay sida xisaab hubinta, baaritaanada, iyo shati bixinta ama howlaha kale ee lagama maarmaanka u ah kormeerka nidaamka daryeelka caafimaad, barnaamijyada faa'idooyinka, ama xaquuqaha rayidka.**10. Loogu Talagalay Badqabka iyo Caafimaadka Dadweynaha.** Waxaa laga yaabaa inaan macluumaadkaaga caafimaad siino maamulada dowladda si loogu isticmaalo howlaha caafimaad ee bulshada sida kahortagga ama xakameynta cudurka, dhaawacyada, ama naafanimada, soo sheegidda xadgudubka, dayacaada, ama rabshadaha qoyska, iyo soo-sheegista ka falcelinta daran ee daawooyinka. **11. Wixii dacwado ah iyo Muran ah.** Waxaa la yaabaa inaan macluumaadkaaga caafimaad u isticmaalno si aan uga jawaabno amar maxkamadeed ama amar maamul, ama si aan uga jawaabno wefti maxkamadeed, codsi cilmi-baaris, ama hannaan kale oo sharci ah haddiiba la sameeyay dadaallo aan kuugu soo wargelineyno codsiyadan ama aan ku helayno oggolaanshahaaga. **12. Dhaqangelinta Sharciga.** Waxaa laga yaabaa inaan u fasaxno PGI-gaaga sarkaalka fullinta sharciga ou ujeedooyinka fullinta sharciga qaar, sida soo wargelinta dambiga dhismayaasheena ama ka jawaabida weydiimaha sharci fullinta sharciga ah.**13.Shaqooyinka Dowlada da U gaarka ah y..** Waxaa laga yaabaa inaan siideyno PHI-kaaga:(1) haddii aad xubin ka tahay ciidamada xooga, sida looga baahanyahay amarka maamulada militiriga; (2) haddii aad macbuus tahay ama aad ku xirantahay, xarumaha ama saraakiisha fullinta sharciga; (3) ka jawaabista codsi ka socda laanta fullinta sharciga, sida waafaqsan xaaladaha qaarkood; (4) sababo la xiriira amniga qaranka ee uu sharciga ogolaadey; (5) sarkaal ka socda federaalka kaas oo loo igmaday ilaalinta Madaxweynaha, dadka kale ee sharciyeysan ama madaxda wadamada ajaanibta.**14. Wixii Magdhowga Shaqaalaha.** Waxaa laga yaabaa inaan siideyno PHI-kaaga ee magdhowga shaqaalaha ama barnaamijyada la mid ka ah. **15. Ku- Deeqidda/Tabarucida XubnahaJirka.** Waxaa sidoo kale laga yaabaa inaan u fasaxno PHI-gaaga howlaha xubinta ama ururo la mid ah oo ujeedooyinka ku deeqida ama xubin ku beerista. **16. Wixii baarayaasha iyo Agaasimaha Aaska.** Waxaa laga yaabaa inaan macluumaadka caafimaad siino agaasimaha aaska guriga, baaritaan-sameeyaha, ama baaraha caafimaad si waafaqsan sharciga si loogu oggolaado inay gutaan waajibaadkooda. **17. Wixii wakiilka Gaarka ah.** Waxaa laga yaabaa inaan macluumaadkaaga caafimaad siino qof sharci ahaan loo oggolyahay inuu ku matalo adiga, sida waalidka, mas'uulka sharciga ah, ama maamulaha ama gacan-ku hayaha maalkaaga. **18. Caddeynta Tallaalka.** Waxaa laga yaabaa inaan cadeynta tallaalka siino iskuul wixii ku saabsan arday, sida sharcigu farayo, haddii uu oggolaado waalidka / mas'uulka, ilmaha yar ee madax bannaan, ama shaqsiyaadka kale ee loo igmaday.**19. Cilmi baaris.**Waxaan isticmaali karnaa ama kshaac ugu qaadi karnaa PHI sida la xiriirto ujeedooyinka cilmi baarista, taas oo kaaga baahan karto ansixintaada (lagu qeexay hoos).Waxaan sidoo kale isticmaali karnaa ama fasaxi karnaa PHI:(1) sida waafaqsan ka dhaafida guddiga dib u eegida machadka ama guddiga asturnaanta; (2) diyaarinta cilmi baarista; iyo (3) sida xog xadidan (PHI taas oo sharaxaado badan oo aqoonsanayo laga saaro).

**Isticmaalada iyo Shaacinta Macluumaadka Caafimaad ee u Baahan Oggolaanshahaaga:** Ma isticmaaleyno ama shaaca uga qaadaynaa PHI-gaaga iyada oo aan jirin ogolaanshahaaga, illaamaa isticmaalo ama shaac ka qaadista noocaas ah lagu ogolaado HIPAA. Waxaad uga ka laban kartaa oggolaanshaha qoraal ahaan xili walba sida lagu qeexay ansixinta.Ka laabashadaada waxay joojineysaa isticmaal dheeraad ah ama shaac ka qaadista PHI oo ujeedooyinka lagu dajiyay ansixintaada saxiixan, marka laga reebo baaxada aan horay uga falcelinay sida waafaqsan ansixin noocaas ah ama uu sharciga na mamnuucay. Waa inaan sidoo kale raacno sharci kasta oo ka adag HIPAA.**1. Iibinta Macluumaadka Caafimaad.** Uma isticmaali doonno ama ma shaacin doono macluumaadkaaga caafimaad si aan ugu badalano lacag-bixin toos ah ama aan toos ahayn marka laga reebo haddii aad noo oggolaato inaan sidaas sameyno, ama ay HIPAA noo oggolaato. Waxaa laga yaabaa inaan isticmaalno ama shaaca ugu qaadno macluumaadka markii macluumaadka dib loogu aqoonsado sida waafaqsan HIPAA.**2. Qoraalada Daaweynta maskaxda .**Marka laga reebo duruufo xaddidan, waxaa laga yaabaa inaan isticmaalin ama fasaxin qoraalada daaweynta maskaxda ee ay qoreen shaqaalaha caafimaadka maskaxda oo diiwaangeliya wada sheekeysigaaga inta lagu jiray kulanka la talinta iyada oo aan jirin ogolaanshahaaga.**3. Suuq-geyn.** Iyadoon la helin oggolaanshahaaga, ma isticmaali karno mana shaacin karno macluumaadkaaga caafimaad si loogu isticmaalo ujeedooyin ah suuq-geyn. **4. Cilmi-baaris.** Waxaan isticmaali karnaa ama shaac ugu qaadi karnaa PHI ujeedooyinka cilmi baarista oo ay wehliso ansixintaada, marka lagu daro daruufaha kor lagu qeexay.

**Waxaad Leedahay Xuquuqaha Soo Socda Oo Khuseeya Macluumaadkaaga Caafimaad ee PHI gaaga:** 1. Waxaad codsan kartaa in xayiraad la saaro isticmaalka ama shaacinta Macluumaadkaaga Caafimaad ee loogu isticmaalayo daaweynta, lacag bixinta ama howlaha daryeelka caafimaadka, ama macluumaadkaaga inaan siino qof ku lug leh daryeelkaaga ama bixinta kharashaadka daryeelkaaga, sida xubin qoyska ka tirsan ama saaxiib. Khasab ma aha inaan oggolaano. Haddii aan ogolaano, waxaan u hogaansameynaa codsigaaga marka laga reebo xaaladaha degdegyada qaarkood ama sida looga baahanyahay sharciga. 2. Waad codsan kartaa xadeynada fasaxida qaar ee PHI-gaaga ee qorshaha caafimaadkaaga oo ujeedooyinka lagu sameynayo daaweyn, lacag bixin ama howlgalada daryeelka caafimaadka ee la xiriiro adeegyada si buuxdo loo bixiyay (oo jeebka laga bixiyay). 3. Waad baari kartaa oo waad heli kartaa warqad ama koobiga elektarooniga ah ee diiwaanadaada caafimaadka, haddii si diyaar ah loo soo saari karo, kugu jaheeyo inaan siino wakiilkaaga. Waxaan kugu soo dalici karnaa qarashaadka si aan ugu jawaabno codsigaaga. Waan diidi karnaa codsigaaga, taas oo markaa aad codsan karto dib u eegis in lagu sameeyo diidmada. 4. Waxaad codsan kartaa inaan badelno Macluumaadka Caafimaadka qaarkood haddii uu qaldanyahay ama uusan dhameystirneyn.Waa inaad sheegtaa sababta lagu taageerayo codsigaaga.Waan diidi karnaa codsigaaga haddii Macluumaadka Caafimaadka uu sax yahay uuna dhammeystiran yahay ama aannu qeyb ka ahayn macluumaadka caafimaadka uu hayo ama loogu talagalay adeeg bixiye ku jira qorshaheena daryeelka caafimaadka.Haddii aan diidno codsigaaga, waxaad xaq u leedahay inaad soo gudbiso bayaanka diidmada.Codsigaagu wuxuu qeyb ka noqon doonaa diiwaankaaga caafimaad, taas oo lagu dari doono markii aan shaaca ka qaadno shayga ama bayaanka aad rumeysan tahay inuusan dhammaystirnayn ama khaldan yahay.5.Waxaad codsan kartaa xisaabinta siideynta PHI-kaaga.Tani waa liiska shaac ka qaadista lagu sameeyey Macluumaadkaaga Caafimaad, oo aan ahayn daaweyn, lacag-bixin ama howlaha daryeelka caafimaadka, iyo waxyaalaha kale ee sharcigu uu oggolaaday.Codsigaagu waa inuu cayimaa muddo aan ka dheerayn lix sano laga bilaabo taariikhda codsiga.6.Waad codsan kartaa inaan kuula soo xiriirno qaab gaar ah ama goob gaar ah.Tusaale ahaan, waxaad codsan kartaa inaan kaala soo xiriirno kaliya shaqada ama daganaansho kale ama xafiiska sanduuqa boostada.Codsigaaga qoran waa inuu sheegaa sida ama goobta aad rabtid in lagaala soo xiriiro.Waxaan ku siineynaa codsiyo macquul ah.Haddii aad jeclaan laheyd inaan ku dhaqantid kuwa ka mid ah xaquuqahaan, la soo xiriir goobaha Walmart, Sam Club, ama Walmart Health eek u siiyay adeegyadaada si aad u heshid foomka ku habboon, ama aad u soo gudbisid codsi U hogaansanaanta HIPAA, Walmart Inc., 2608 SE J Street, Mailstop 0230, Bentonville , AR.72716-0230.Waxaad ka heli kartaa nuqul warqad ah oo Ogeysiintaan ah Walmart, Sam Club, Walmart Health, ama onleenka ee:https://corporate.walmart.com/privacy-security/notices/.

**Isbadelada Ogeysiintaan ee Sharciyada Qarsoodiga:** Waxaan xaq u leenahay inaan wax ka badalno Ogeysiiskaan iyo inaan dhaqangelino Ogeysiiska dib-u-eegista lagu sameeyey ee macluumaadka caafimaad ee aan hayno ama aan heli doono mustaqbalka. Waxaan soo dhigeynaa koobiga Ogeysiinta hadda. Haddii aan badalno Ogeysiiskayaga, waxaad heli kartaa nuqul ka mid ah Ogeysiiska dib-u-eegista lagu sameeyey markii aad codsato ama khadka tooska ah ee internetka:https://corporate.walmart.com/privacy-security/notices/.

**Wixii Warbixin Dheeraad ah ama si aad usoo Wargelisid Dhibaato:** Haddii aad wax su'aalo ah ka qabtid Ogeysiiskaan, la xiriir HIPAA, Walmart Inc., Wadada 2608 SE J, Mailstop 0230, Bentonville, AR. 72716-0230 or phone (800) WAL-MART. Haddii aaminsantahay in xuquuqdaada arimahaaga gaarka ah lagu xadgudbay, waxaad xareyn kartaa cabasho qoran, oo ma jireyso wax aargoosi ah, ee caafimaadka iyo fayo qabka Sarkaalka Cabashada HIPAA ee ciwaanka kore, ama la jiro Xoghayaha Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Iinsaanka, Xafiiska Xaquuqda Madaniga.

***Xaquuqaha Rayidka Bukaanka :*** 1. Si buuxdo ula soco xili hore wax ku saabsan daryeelka/adeega lagu siinayo, oo ay ku jiraan aagaga adeegyada ee diyaariyo daryeelka iyo booqashooyinka joogtada ah, sidoo kale sida badelaado walba ee qorshaha daryeelka; 2. Ka qeybqaado hormarinta iyo dib u eegida qorshahaaga daryeelka;3. Aad diido daryeelka ama daaweynta kadib halisaha diidmada daryeelka ama daaweynta si buuxdo ayaa loo soo bandhigay; 4. Ula soco, hadal iyo qoraal ahaan, xili ka horeeyo intaan daryeelka la bixin, ee dalacaadyada, oo ay ku jiraan lacag bixinta daryeelka/adeega laga filanayo dhinacyada sadexaad iyo dalacaadyo walba ee macmiilka/bukaanka masuul ka noqonayo; 5. Ku haysto hantidaada iyo qofka lagula dhaqmo ixtiraam, tixgelinta iyo aqoonsashada sharafta shaqsiyeed; 6. U suurtogasho aqoonsashada xubnaha shaqaalaha soo booqanayo ee dhinaca aqoonsiga ku haboon; 7. Xor ka ahaado ula dhaqan xumo, dayacaad, ama xadgudubka hadalka, maskaxda, galmada iyo jireed,

oo ay ku jiraan dhaawacyada illaha aan la garaneyn, iyo ku haboon la'aanta hantidaada; 8. Calool xumada/cabashada codka ee la xiriirto daaweynta ama daryeelka, ixtiraam la'aanta hantida ama badelada xeerka, shqaalaha ama daryeelka/adeega iyadoon jirin xadidaad, faragelin, juujuubid, takoorida ama aargoosi; 9. Aad qabtid cabashooyin/calool xumo la xiriirto daaweynta ama daryeelka ah (ama ku guuldareysto in) laguu diyaariyo, ama ixtiraam la'aanta hantida la baaray; 10. Qarsoodiga iyo asturnaanta; 11. Ka taxadar xeerarka wakiilka iyo nidaamyada la xiriiro siideynta diiwaanada caafimaadka; 12. Heshid daryeel ku haboon iyadoon jirin takoor sida waafaqsan dalabyada bixiyaha; 13. Heshid maclumaadka ku saabsan baaxada adeegyada hay"ada ay siineyso iyo maclumaadka gaarka ah ee adeegyadaan. Masuuliyadaha Bukaanka: 1. Aad bixiso warbixin dhameystiran oo saxan ee ku saabsan caafimaadkaaga hadda, daawooyinka, alaarjiyada, iwm, markii ay ku haboontahay daryeelkaaga/adeega; 2. Uga qeybqaado, sida loogu baahanyahay ee suurtogalka ah, hormarka, sameeynta iyo badelida qorshaha daryeelkaaga.

**Adeegyada Caawinta Luuqada iyo Caawinada Dheeraadka ah** : U hogaansanaanta Qeybta 1557 ee Xeerka Daryeelka La goyn karo, waxaan bixinaa adeegyada caawinta luuqada iyo kaalmada kalkaaliyaha ee ku haboon iyo adeegyo markii la codsado oo bilaash ku ah macaamiisha iyo xubnaha, sidoo kale sida bukaanada, ka qeybqaatayaasha, ka faa'ideystayaasha, is diiwaangeliyayaasha, iyo codsadayaasha barnaamijyada daryeelkeena caafimaad, howlaha, ama adeegyada.

**Walaacyada Macmiilka: Waxaad soo wici kartaa (800) WALMART** haddii aad qabtid walaac ku saabsan qiyaano iyo xadgudub ama ula dhaqan walba ama adeegyada uu bixiyo ururkeena, ama waxaad la xiriiri kartaa Guddiga Aqoonsiga ee Daryeelka Caafimaadka (ACHC) ee (919) 785-1214 ama (855) 937-2242 haddii cabashadaada aanan la xalin. Waxaad sidoo kale soo wici kartaa Xafiiska Baaraha Guud ee (800) 447-8477.

**Heerarka Saadka Medicare DMEPOS:** Badeecada iyo/ama adeegyada ay ku siiyeen Walmart Inc. waxay quseeyaan heerarka saadka ee ku jiro xeerarka Faderaalka ee aad ka muuqdo Xeerka 42 ee Xeerarka Faderaalka Qeybta 424.57(c). Heerarkaan waxay quseeyaan xirfadlaha ganacsiga iyo arimaha howlgalka (tusaale ahaan, damaanadaha sharafeynta iyo saacadaha howlgalka). Qoraalka buuxo ee heerarkaan waxaa laga heli karaa www.ecfr.gov. Xiliga la codsado waxaan kuu diyaarineynaa koobi qoran ee heerarka.

**Warbixinta Damaanada :** Dhammaan qalabka Medicare uu iibsado ama laga kireeyo shirkadeena waxay wadataa damaanda warshada oo hal sanno ah.

Wixii macluumaadka dheeraad ah ee ku saabsan macluumaadka damaanada ama tilmaamaha fadlan la hadal farmashigaaga.

**Sawir Koodhka QR oo nooca dhijitaalka ee Ogeysiimaha**